Erayga iyo Maanta Somtwt 0257

ARRIN CAALAMI AH

Dhegaystayaal waa barnaamijkii toddobaadlaha ahaa oo aad ka maqashaan saacadahan oo kale isla idaacaddan. Waa barnaamij aynu kaga hadalno ama ku soo qaadanno mawduucyo kala duwan oo xiiso leh toddobaad waliba. Mowduucayaga caawa wuxuu ku saabsan yahay arrimo **CAALAMI AH.**

Barnaamijkan waxaa inoo soo diyaariyey hay'adda Erayga iyo Maanta, waxaana waxbariddan isku soo dubba-riday wadaadka la yiraahdo Doug Schroder. Sii dhegayso barnaamijka saaxiib marka aynu mawduuca kore ee ku saabsan arrimo **CAALAMI AH** ee aan halkan idiinku lafaguri doonno aad maqli doontaan. Haatanse aynu dhegaysnno qasiiddadan.

SONG: RABI BAA AWOOD LEH.

Waxaa jira waxyaabo caadi noqday oo dunida yaalla oo leh awood aan caadi ahayn oo aad iyo aad u weyn. Matoorka nuclearka waxaa walaaqa oo wareejiya curiye aan muuqan ama DNA, oo isna aan muuqan, oo leh awood uu unugyo ku abuuro; waxaana ugu wacan warbixinnada yaabka leh ee ku jira DNA ama curiyaha. Waxaan markaas maanta doonayaa inaan qaddar isla meel dhigno dhacdo cajiib ah oo awood lahayd ee dhacday, waana dhalashadii Ciise Masiix.

Bal si farsamaysan aynu taa u caddayno, waayo qof kasta wuxuu mar kasta ka hadlaa dhalashada Ciise Masiix. Farsamo ahaan Kitaabku wuxuu ina barayaa in Ciise ahaa mid rabbaani ah, oo ah wiilkii Ilaah taas aawadeedna uu ahaa mid weligiis nool. Markii aan ka hadalno wax ku saabsan dhalashada Masiixa, waxaan ka hadlaynaa dhalashada Masiixu uu ka dhashay jirka ee uu qaatay qaab aadaminimo.

Waxaan caadi ahaan niraahnaa dhalashada Ciise, laakiin farsamo ahaan, waa qaadashadii Ciise Masiix qaatay jir aadaminimo.

Waxaan u soo qaadannaa taas sida dhalasho caadi ah. Dhalashada Ciise ayaa wax waliba daa'iman u bedeshay. Si guud ayaa dhalashadu u keentay saamayn aan sinnayn ama dheellitirnayn, taasina waa sida ay tahay waayo Ciise Masiix maahan qof iska caadi ah. Isagu waa wiilkii Ilaah, oo waxaad ka akhrin kartaa wax badan oo xaalkan ku saabsan Injiilka sida Yooxanaa u qoray cutubka 1aad halkaasoo looga hadlayo shakhsiyadda dhabta ah ee Ciise Masiix inay ahayd rabbaani, kaasoo dunida yimid ama ku noolaa muddo.

Waxaannu bal qaddar haddana isla eegaynaa sharcigada caalamka ka jirta, iyo mabaadiida, iyo awoodaha, iyo sidii xaaladuhu ahaayeen, kuwaasoo inaga ina khuseeya. Waxaan markaa jecelahay inaan idinla wadaago asbaabta keentay in maalinta dhalashada Masiixu timaaddo. Aadmiga waxaa qabsaday dabin, taasoo ay keentay awoodda dembiga. Waxaa ku qoran Warqaddii rasuul Bawlos u qoray dadka reer Rooma 7:21-8:1-2 Bawlos oo ka hadlaya khibradaha noloshiisa, wuxuuna leeyahay: **"Haddee waxaan arkaa qaynuunka in shar ila jiro in kastoo aan doonayo inaan waxa wanaagsan sameeyo. Waayo, sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah. Laakiin waxaan xubnahayga ka arkaa qaynuun kale, isagoo la dagaallamaya qaynuunka maankayga oo maxbuus iiga dhigaya qaynuunka dembiga oo xubnahayga ku jira. Nin belaysan baan ahay. Yaa iga furan doona jidhkan dhimashada leh? Waxaan Ilaah ugu mahadnaqayaa inuu Rabbigeen Ciise Masiix igu furan doono.**

Sidaas daraaddeed aniga qudhaydu waxaan maankayga ugu adeegaa sharciga Ilaah; laakiinse waxaan jidhka ugu adeegaa qaynuunka dembiga. Sidaas daraaddeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haatan xukun ma laha. Waayo, qaynuunka Ruuxa nolosha ee ku dhex jira Ciise

Masiix ayaa iga xoreeyey qaynuunka dembiga iyo dhimashada.”

Markii Bawlos uu ka hadlayey waxa ku saabsan sharciga, oo ah sharciga dembiga, waa sharciga nolosha e, wuxuu ka hadlayaa xaalad jirta. Haddii aynu ka hadalno sharciga caalamka ee khuseeya noolaha, waxaan haysannaa sharciga cuf-soo-jiidka. Cufs-soo-jiidka waa xoog na saamaynaya innaga oo dhan wakhti kasta oo aan nool nahay. Waxaa kaloo jira sharciga loo yaqaanno thermodynamics, khaasantan kan loo yaqaanno entrop oo aan anigu jecelahay. Waa sharciga hoos loo soo degayo, oo laga imaanayo xaalad sare ilaa la soo gaaro xaalad aad u hoosaysa.

Aasaasiyan, kitaabka Baybalku wuxuu ka hadlaa gunnimada qurunka ku dambaysa, waxaana keena saamaynta dembiga. Tanina waa waxa inagu dhaca markii shar iyo musuq ay ina soo galaan, waxayna dhimaysaa ama meesha ka saaraysaa oo burburinaysaa noloshaada. Ugu dambaystana waxay noqonaysaa sida dadku yiraahdo aalaaba: “xaalkaygu wuxuu noqday ‘Kud ka guur oo qanje u guur’, ama iyagoo leh, xaaladuhu way ka sii darayaan, oo shalay baa maanta dhaantay’. Waxaana taas ugu wacan ama keenaya saamaynta dembiga inagu jira.

Wuxuu Bawlos taas ugu yeerayaa ‘sharciga dembiga’. Xusuuso in tani tahay mabda’ iyo xaalad, iyo awood ina kicisa, taasina waa sababta aannu midkeen kasta kaamil ku noqon karin. Waana sababta midkaya waliba aanay maalin qura ka soo wareegin isagoo aan dembaabin ama aanay qalbigiisa soo gelin fikirro shar ah ama damac. Cidina taasi kama baxsan karto ama qiil u heli mayso. Waana sababta ay ku timid dhalashada caamka ah ee Masiixa.

Waana sababtii Ciise Masiix u dhashay, oo taasuna ay keentay in la helo wax ka sii awood badan sharciga dembiga ee ka dhex shaqaynaya nolosheenna. Waxay keentay in Wiilkii Ilaah qaato rabaaninimada, isagoo oo wata awood weyn, ee uu dunida yimaado si xaalkaas dib loogu noqdo ama wax looga qabto. Waana waxa aad u baahan tahay inaad ka fahamto ama ogaato sababta maalinta dhalashada Masiixa ay ugu dabaaldegaan masiixyiinta.

Micna ma lahan hadiyadaha la bixiyo maalintaas iyo saxmadda xilliga, iyo dareenka iyo fantasiyaha. Balse maalinta dhalashada waxay khusaysaa xaqiiqo ahaan sidii Ilaah xaalka dembiga iyo dhimashada dadka wax uga qabtay ama xal uu ugu keenay. Masiixa waxaan ku haysannaa awood shaqaynaysa, iyo sharci cusub ama mabaadii ka shaqaynaysa nolosha rumaystayaasha.

Taasna waa waxa rasuul Bawlos inoogu sheegayo 8:1-2 markaasoo uu lahaa: "**Sidaas daraaddeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haatan xukun ma laha. Waayo, qaynuunka Ruuxa nolosha ee ku dhex jira Ciise Masiix ayaa iga xoreeyey qaynuunka dembiga iyo dhimashada.**"

Waxaad u baahan tahay inaad sheey ogaato, micnana ma leh hadday noqoto wakhtiga dhalashada Masiixa, amase xilliga xagaaga, wakhti kastoo ay tahay dhib ma lah, xitaa hadday tahay wakhtigii dhalashadaada, ama maalin kale oo wacan, ama maalinta kugu xun, wakhti kastoo ay tahayba ogow inaad ku jirto xaalad dhimasho iyo dembi. Waa inaad markaa isbeddesho, is geddiso haddii kale oo aad gasho xaalad noqonaysa mid nololeed.

Tanna waa waxa Ciise Masiix keenay, waana waxa uu siinayo kuwa isaga rumaysta oo rajada ku qaba, waxayna taasi kaa soo samatabbixinaysaa burbur aan laga baaqsan karin,

iyo naxdin ku dhamaata dhimasho, taasoo lagu keeno nolosha daa'imka ah. Taasina waa waxa Injiilku yahay; waana waxa Rajada maalinta dhalashada Masiixu ay xaqiiqa ahaan ku saabsan tahay ama u taagan tahay. Mid baanse jeclaan lahaa inaan sharaxo ee isla xaalkan ku saabsan, waxaana weeye in masiixinimadu ay tahay caalami. Masiixinnimadu waa arrin caalami ah, oo khusaysa qof kasta oo aadami ah isla sida sharciga cufsoojiidka uu u saameeyo dadka oo dhan.

Markaasina sharciga nabaadiinada amase sharciga nolosha ee Ciise laga helo ayaa qof waliba heli karaa. Waa wax aad u baahan tahay inaad fahamto inkastoo Ilaah uusan bixinin ama ina siinaynin nooc kasta oo laysaga caabiyo dhibatooyinka dembiga. Masiixinimado maahan waxa ay dadka qaar ugu yeeraan caalamiyeynta. Caalamayeynta waa waxbarid qofku rumaynayo wax kasta, oo waxay aaminsan yihiin in diin waliba ku badbaadinayso, oo qof waliba aado jihadii uu doono, waxayna rumaysan yihiin oo kale in dadka oo dhan ay ahlu janno yihiin.

Ha yeeshee taasi maahan waxa kitaabka Baybalku ina barayo, mana ahan sida Ilaah dadka u samatabbixiyo. Haddii qofi qabo cudur ama uu ku jiro xaalad degdeg ah oo ay qabaan cudurrada qaar oo aadan dawo kasta ku dawayn Karin. Markaana waa inaad ka dawayso xaaladda adhabta ah ee cudurkooda. Markay halkan joogto, nabaadiinada lagu helo Ciise Masiix ayaa halbeeggu noqonayaa. Masiixiyintu ma rumaysna in diin kasta ay dadka geynayso hal meel. Markii aad doonayso inaad gaarto magaalo khaas ah, qaadi maysid wadda kasta, waxaase jira hal waddo oo tagaysa magaaladaas, waana waxa qorniinku uu ina barayo. Waxaa kaloo jira hal badbaadiye iyo hal dow oo lagu gaaro jannada. Ilaah wuxuu inagu siiyey xalka Ciise Masiix.

Ma jiro nebi kale, iyo bixiye kale, ama xal kaleeto toona. Waxaad u baahan tahay inaad maskaxdaada furto oo aad geliso inuu jiro oo keliya hal jid oo lagu geddiyo, mabda’ ahaah, xaaladaha dembiga iyo dhimashada ee niyaddaada, waana markaad noloshaada siiso Ciise Masiix. Waxaad rumaysadkaaga saaranaysaa Ciise Masiix, oo ah xalka. Taasina waa wax caalami ah, mana ahan xalka dunida ee wax waliba layska rumaysanayo, laakiin waa dawada jirta, iyo xalka keliya ee dadka oo dhan ay leeyihiin iyadoo aan loo eegaynin, qabiil, luuqad, hanti, midab ama garasho.

Waxyaabahaas micna ma leh. Haddii aad tahay qof aadami ah, waxaa laguugu samatabixin karaa Ciise Masiix, oo taasi waa wax caalami ah. Ciise Masiix wuxuu u yimid dadka oo dhan. Markaa taasi waxay ka macne tahay nabaadiino, waana sida Ilaah nooga samatabbixiyo dembiga, oo ah wax cayiman oo dad khaas ah ku socda, inkastoo weliba ay leeyihiin dadka oo dhan, oo ay ku helayaan kharash la’aan.

Qof kasta wuxuu u iman karaa Ciise wakhti kasta oo wuxuu heli karaa hadiyaddaas. Taasina waa farxadda dhabta ah oo ay haystaan Masiixiyiinta. Waana fantasiyaha Ilaah u keenayo awoodda saamaynta leh ee dembiga. Kaasina sharciga nolosha ee leh saamaxaadda iyo nabaadiinada. Haddaba, wax lala yaabo maahan in maalinta la xusuusto dhalashada Masiixa ay tahay wakhti farxad u leh dadka fahamsan kitaabka Qoduuska ah. Haddaba, waxaad u baahan tahay inaad fahamto in aad leedahay fursad aad kaga xoroobayso sharciga, iyo awoodda dembiga, musuqa iyo dhimashda. Maahan inaad Ilaah ka fogaato ee ugu imow isaga adigoo is hoosaysiinaya oo sii isaga noloshaada.

Rumayso Ciise Masiix inuu yahay badbaadiyahaaga, waxaanad helaysaa hanaankaas wata isbeddelka ee kugu hoggaaminaya nolosha daa'imka ah, oo kol dambe ku jiri maysid xukunka dembiga, laakiin waxaaad hoos gelaysaa awoodda nolosha daa'imka ah ee ku jirta Ciide Masiix. Waxaan rajaynayaa inay taasi ku farxad gelisay! Waxaan kaloo rajaynayaa inaad garatay farxadda ay leedahay maalinta dhalashada Masiixa ama Christmaska!
Waa xaalad isbeddel oo lagu helay Ciise Masiix oo aad ka gudubtay inaad hoos joogto dembiga, oo lagu keenay xaalad ammaanan oo leh xoriyad jacayl iyo farxad abadan ah adigoo la jooga Ilaah.

SONG: EEBBE WAA RAXIIM

Waxaa haddaba intaas noogu soo dhammaanaya barnaamijkeennii caawa, habeenka xiga ayaannu halkii ka sii wadi doonnaa. Waxaa barnaamij kan oo kale ah ka maqli doontaan toddobaadka dambe (saacadahan oo kale isla idaacaddan) Waxaad waraaqaha noogu soo qortaan P.O. Box 21514, oo koodku yahay 00505. Farriimaha SMSka waxaad noogu soo diri kartaan tel: 0707032060. Emailkayaga waa afarah@twr.co.ke. Waxaa kaloo aad isla barnaamijkan ka daalacan kartaa websitekayaga, waxaana weeye isna www.twr360.org. Farriinta waxaad ka soo hor-marinaysaa Barnaamijka Soomaaliga, dabadeedna waxaad qortaa telefoonka oo ah 0707032060.